# Qiimeynta Gargaarka

Fadlan si taxaddar leh u akhri dhammaan tilmaamaha oo nala soo xiriir haddii aad qabto wax su'aalo ah.

Muhiim: WAXAAD U QALMI KARTAA INAAD HESHO DARYEEL BILAASH AH AMA DARYEEL LA DHIMAY. Buuxinta codsigan waxay ka caawin doontaa BJC Health ("BJC") inay go'aamiso haddii aad heli karto adeegyo bilaash ah ama la dhimay ama aad u qalanto barnaamijyo kale oo dadweyne oo kaa caawin kara bixinta daryeelkaaga caafimaad.

HADDII AAD AAN CAYMIS LAHAYN, LAMBARKA SOSHAL SEKURITIGA LOOMA BAAHNA SI AAD UGU QALANTO DARYEEL BILAASH AH AMA DARYEEL LA DHIMAY OO KA YIMAADA BJC. Si kastaba ha ahaatee, Lambarka **Soshal Sekuritiga ayaa looga baahan yahay qaar ka mid ah barnaamijyada dadweynaha**, oo ay ku jirto Medicaid. Bixinta Lambarka Soshal Sekuritiga lama khasbo, balse waxay ka caawin doontaa BJC inay go'aamiso haddii aad u qalanto barnaamijyo dadweyne.

BJC Health waxaa ka mid ah isbitaallo iyo hay'ado caafimaad oo ka tirsan BJC HealthCare, Saint Luke's, iyo St. Louis Children's at CoxHealth. Si aad ula xiriirto Kooxda Adeegga Macaamiisha, wac ama iimayl u dir xogta soo socota:

| BJC HealthCare | Saint Luke's | St. Louis Children's at CoxHealth |
|---|---|---|
| 314-362-8400 | 816-932-5678 | 417-815-8846 |
| 855-362-8400 | 888-581-9401 | 833-345-1395 |
| patacct@bjc.org | slhsbilling@saintlukeskc.org | financialassistanceapplications@coxhealth.com |

Fadlan buuxi foomkan oo u gudbi hay'adda aad ka codsanayso gargaarka. Waxaad ku gudbin kartaa foomka si shaqsi ah goobta adeegga ama adigoo raacaya tilmaamaha gudbinta ee hoose si aad u codsato daryeel bilaash ah ama daryeel la dhimay. **Foomamka gargaarka dhaqaale waa in la gudbiyaa 240 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda biilka ugu horreeya.**

- **BJC HealthCare:** Ku dir boostada P.O. Box 790024, St. Louis, MO 63179-0024, iimayl u dir patacct@bjc.org, ama fakis u dir 314-747-6977.
- **Saint Luke's** (Plaza, Waqooyiga, Koonfurta, Bariga, Allen County, Anderson, Hedrick iyo Wright Hospitals) iyo haraaga biilasha dhakhaatiirta ee Anderson, Hedrick, Wright, iyo Saint Luke's Physician Group: Ku dir boostada Saint Luke's, 901 E. 104th St., Attn: Hospital CBO 6th Floor, Kansas City, MO 64131, ama iimayl u dir slhsbilling@saintlukeskc.org.
- **Saint Luke's Home Care & Hospice:** Ku dir boostada Saint Luke's Home Care & Hospice, 901 E. 104th St., Attn: Home Care & Hospice 6th Floor, Kansas City, MO 64131 ama iimayl u dir slhsbilling@saintlukeskc.org.
- **Bishop Spencer Place:** Ku dir boostada Bishop Spencer Place, 4301 Madison Ave., Kansas City, MO 64111.
- St. Louis Children's at CoxHealth: Ku dir boostada St. Louis Children's at CoxHealth, Attn: Financial Counselors, 1423 N. Jefferson Ave., Springfield, MO 65802.

Bukaanku wuxuu qirayaa inuu sameeyay dadaal daacad ah si uu u bixiyo dhammaan macluumaadka lagu codsaday codsiga si uu uga caawiyo isbitaalka go'aaminta in bukaanku u qalmo gargaarka dhaqaale.

Haddii bukaanku degan yahay Illinois, aanu caymis lahayn, isla markaana adeegyo ka helay Alton Memorial Hospital, Memorial Hospital ee ku yaala Belleville ama Memorial Hospital ee ku yaala Shiloh, cabashooyinka ama walaacyada la xiriira habka codsiga qiimo-dhimista bukaannada aan caymiska lahayn ama habka gargaarka dhaqaale ee isbitaalka waxaa lagu soo sheegi karaa Health Care Bureau of the Illinois Xeer Ilaaliyaha Guud mareegta https://illinoisattorneygeneral.gov/Consumer-Protection/Health-Care/ ama adigoo wacaya 877-305-5145.



3259250-02-03-2025

# Qiimeynta Gargaarka

| MACLUUMAADKA BUKAANKA | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca Bukaanka | | Taariikhda Dhalashada (Date of Birth, DOB) | Lambarka Soshal Sekuritiga ee Bukaanka (Ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn) |
| Jinsiyad (Ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn) | Qowmiyad (Ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn) | Jinsi (Ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn) | Luqadda La Doorbidayo (Ikhtiyaari ah oo aan khasab ahayn) |

| BUKAANKA | QOFKA MAS'UULKA KA AH BIILKA |
|---|---|
| Miyuu deganaa Illinois wakhtigii adeeg-bixinta? Haa ____ Maya _____ | Magaca |
| Waddada | Waddada |
| Magaalo, ZIP-ka Gobolka | Magaalo, ZIP-ka Gobolka |
| Taleefanka: ( ) | Taleefanka: ( ) |
| Iimeyl: | Iimeyl: |

| MACLUUMAADKA SHAQADA | |
|---|---|
| Loo-shaqeeyaha Bukaanka / Qofka Mas'uulka ka ah Biilka | Magaca Lammaanaha / Saaxiibka Nolosha / Mas'uulka |
| | Loo-shaqeeyaha Lammaanaha / Saaxiibka Nolosha / Mas'uulka |

| MACLUUMAAD KALE | |
|---|---|
| 1. Bukaanku ma ku lug lahaa shil la tuhunsan yahay oo sababay baahida adeegyada? | Haa _______ Maya _____ |
| 2. Bukaanku ma ahaa dhibane dembi la tuhunsan yahay oo sababay baahida adeegyada? | Haa _______ Maya _____ |
| 3. Immisa qof ayaa ka tirsan qoyska iyo/ama guriga bukaanka? | |
| 4. Magaca, xiriirka iyo da'da dadka ku tiirsan bukaanka/qofka mas'uulka* ka ah biilka? | |

*Ku tiirsane waxaa loola jeedaa qof aan qaangaar ahayn ama qof kasta oo lagu diiwaangeliyay inuu ku tiirsan yahay bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah warqadda canshuur celinta federaalka.



3259250-02-03-2025

| LIIS GARAY DHAMMAAN DABOOLKA CAYMISKA EE KU QORAN QAYBTA HOOSE EE LA XIRIIRA ADEEGGA LA HELAY** | | | |
|---|---|---|---|
| Nooca Caymiska | Magaca Caymiska | Lambarka Gaarka ah ee Qandaraaska Caymiska | Lambarka Kooxda |
| Caymiska Caafimaadka | | | |
| Medicare | | | |
| Kaabista Medicare | | | |
| Medicaid | | | |
| Faa'iidooyinka Ciidamadii Hore | | | |

## DAKHLIGA BILLAHA AH

(Ku lifaaq mid ka mid ah dukumeentiyada soo socda oo ah Caddeynta Dakhliga)

A. Warqadda canshuur celinta ugu dambeysay

B. Foomka W-2 ee ugu dambeeyay iyo foomamka 1099

C. Laba (2) warqadood oo mushahar ah oo ugu dambeeyay

D. Caddeyn qoraal ah oo dakhli ka timid loo-shaqeeye haddii lacagta lagu siiyo lacag caddaan ah

E. Caddeyn aan la gudbin canshuur (IRS Form 4506)

Macluumaadka dakhliga waa in la bixiyo si codsigaaga loo farsameeyo.

| | Bukaanka | Lammaane/Saaxiib Nolosha | Waalidiin/Mas'uul |
|---|---|---|---|
| Mushaharka Guud ee Bille ah | | | |
| Dakhliga Iskaa-Ushaqeysiga | | | |
| Soshal Sekuritiga | | | |
| Naafonimada Soshal Sekuritiga | | | |
| Naafonimo Gaar ah | | | |
| Naafonimada Ciidamadii Hore | | | |
| Hawlgabka Ciidamadii Hore | | | |
| Shaqo La'aan | | | |
| Magdhowga Shaqaalaha | | | |
| Dakhliga Hawlgabka | | | |
| Masruufka Carruurta | | | |
| Masruufka Lammaanaha ama Taageero Kale oo Lammaane | | | |
| Kaalmada Ku-meelgaarka ah ee Qoysaska U Baahan (TANF, Temporary Assistance for Needy Families) | | | |
| Kuwa kale — Ku Qor | | | |

**KA-REEBITAANNO: Haddii bukaanku degan yahay Illinois, aanu caymis lahayn, isla markaana adeegyo ka helo Alton Memorial Hospital, Memorial Hospital in Belleville ama Memorial Hospital in Shiloh oo uu buuxiyo shuruudaha u-qalmitaanka hordhaca ah ee lagu sharaxay 77 ILAC 4500.40 ama si kale ugu qalmo si hordhac ah iyadoo lagu salaynayo dakhliga qoyska, bukaanku looma baahna inuu buuxiyo qaybtan codsiga.

Haddii bukaanku codsanayo gargaar la xiriira adeegyo laga bixiyay goobaha NHSC, loogama baahna bukaanka inuu buuxiyo qaybta caymiska ee codsiga. Goobaha NHSC ee BJC HealthCare waxaa ka mid ah Missouri Baptist Sullivan Hospital, Bourbon Medical Office, Cuba Medical Office, Steelville Medical Office, iyo Sullivan Medical Office; iyo Parkland Health Center Medical Clinic. Goobaha NHSC ee Saint Luke's waxaa ka mid ah Allen County Clinic–Iola, Anderson County Family Care Center, Hedrick Family Care Clinic, Hedrick Medical Center, Hedrick OB GYN Associates, Saint Luke's Mercer County Clinic, Wright Memorial Hospital, iyo Wright Memorial Physicians Group.

## KU LIFAAQ MACLUUMAAD KALE OO MUHIIM AH OO KU SAABSAN XAALADDA DHAQAALE

SHAHAADO: Waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka ku jira codsigan uu yahay mid sax ah oo run ah inta aan ka ogahay. Waxaan qirayaa in laga filayo BJC Health inaan codsado gargaar kasta oo heer gobol, federaal, ama degmo ah oo aan u qalmi karo si looga caawiyo bixinta biilkan isbitaalka. Waxaan fahamsanahay in macluumaadka la bixiyay ay xaqiijin karto BJC Health, waxaana u oggolaanayaa BJC Health inay la xiriirto dhinacyo saddexaad si loo hubiyo saxnaanta macluumaadka ku qoran codsigan. Waxaan fahamsanahay in haddii aan si ula kac ah u bixiyo macluumaad aan run ahayn codsigan, aanan u qalmi doonin gargaarka dhaqaale, gargaar kasta oo la ii oggolaadayna laga noqon karo, anigana aan mas'uul ka noqon doono bixinta biilka/biilasha.

Saxiixa Bukaanka/Qofka Mas'uulka ka ah — Taariikhda:



3259250-02-03-2025